



Xq -i

2022 eDj

ePPS ax ayi

-ci

bi

Isniinta, Febraayo 14, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay bilaabi doonaan xog-ururinta Dugsiyada Guulaystay ee sannadlaha ah taas oo noo ogolaanaysa inaanu inaanu ururino xog si aanu u gaadhno go'aano warbixin ku salaysan oo ku saabsan cimilada iyo dhaqanka dugsiya. Daaqadda xog-ururintu waxa ay u shaqayn doontaa illaa Maarso 4.

Afar qaybood oo kamid ah bulshada PPS ayaa ka qaybqaadan doona xog-ururinta qarsoon:

- 1) ardayda ku jirta fasallada 3 illaa 12 waxa ay dabooli doonaan xidhiidhada macallinka-ardayga, dareen ka mid ahaansho, badbaadada iyo cimilada dugsiya, ka qaybqaadashada, baraarugsanaanta dhaqan, iyo kala duwanaanshaha iyo ka mid ahaanshaha;
- 2) dhamaan qoysaska PPS waxa ay dabooli doonaan hagaagsanaanta dugsiya, cimilada dugsiya, carqaladaha ka qaybqaadashada, iyo badbaadada dugsiya,
- 3) dhamaan shaqaalaha PPS waxa ay dabooli doonaan cimilada dugsiya, xidhiidhada, waxbarista ardayda, caqliyadda koritaanka, xidhiidhada shaqaalaha-qoyska, iyo badbaadada dugsiya, iyo
- 4) dhammaan hoggaamiyayaasha dhismaha pps waxa ay dabooli doonaan cimilada dugsiya, xidhiidhada shaqaalaha-qoyska, xidhiidhada hoggaanka degmada, ka qaybqaadashada degmada ee guud, waxbarashada xirfadeed, jawaab-celinta iyo tababaridda, iyo ka qaybqaadashada shaqaalaha.



Xog-ururinta Dugsiyada Guulaystay waxa lagu dhamaystiri doonaa onlayn ahaan waxana laga dhigi doonaa linkiga Qoysaska iyo Ardayda. Hoggaamiyayaasha shaqaalaha iyo dugsiyadooda iyaga oo ku helaya linkiga xog-ururinta. Hoggaamiyayaasha shaqaalaha iyo dugsiyadooda waxa ay heli doonaan linkiga xog-ururinadooda xiga. Xog-ururinta Dugsiyada Guulaystay waxa ay ku qaadan doontaa shakhsiyaadka celcelis ahaan 15-30 daqiiqo si loo dhamaystiro waxana lagu heli karaa Ingiriisi, Isbaanish, Raashiyaan, Soomaali, Fiitnaamiis iyo Jayniis. Nuqullada waraaqaha waxa diyaarin doona dugsi walba marka laga dalbado.